

## **Warbixin loogu talagalay Dadka Aanan Ingiriisiga ku Hadlin**

Annagoo ah isbitaalka UCLH waxaan adeegyo turjumaan ugu deeqnaa Dadka nala jooga ee aanan luqadda Ingiriisiga si fiican ugu hadlin. Adeeggaas waxaa loo maraa Adeegyada shirkadda Language Line (Khadka Luqadda). Shirkadda Language Line waxay la shaqaysaa ururro dawli iyo khaas ah oo farabadan iyadoo ku deeqda adeeg turjumaan oo telefoonka lagu helo 24 saacadood maalintii kaasoo adiga kugu xiriiriyaya turjumaan aqoon leh waqti hal daqiiqo ka yar gudahiis.

Si aad u hesho adeegga waa in aad turjumaan ka codsato waaxda ka mid ah UCLH. Habka ugu sahlan ee aad taas u samaynayso waxa weeyaan adigoo qofka ku caawinaya weydiista haddii uu kuugu yeeri karo turjumaan ka socda shirkadda Language Line.

**Fadlan ogsoonow:** Adigu toos uma wici kartid shirkadda Language Line si aad turjumaan u codsato; adeeggaas waa in laga qaban qaabiyo isbitaalka dhexdiisa.

Adeegga waxaa la isticmaali karaa waqti kaste oo maalinta laga joogo meel kastoo la joogo iyadoo la isticmaalayo telefoon nooc kaste ah. Hase yeeshee, isticmaalku waxuu noqon karaa mid xadaysan taasoo ku xiran saacadaha furnaanta ee waaxda aad gargaar uga baahan tahay.

Maadaama aanan loo baahnayn qalab gaar ah, waxaa kuu suurto geli doonta in dadka kale ay ku fahmaan, markastoo aad u baahan tahay in aad la hadasho qof jooga UCLH.

Si aad adeegga u isticmaasho fadlan raac tilmaanbixinta hoose:

Haddii aad la joogto qofka ku caawinaya:

1. Farta ku fiiq luqadda aad u baahan tahay ama qofka ku caawinaya u sheeg luqaddaada.
2. Qofka ku caawinaya ayaa wici doona shirkadda Language Line si uu u codsado turjumaan isagu hubin doona in lagu fahmo.
3. Turjumaanku waxuu kuu sheegi doonaa cidda uu yahay qofka adiga ku caawinaya. Waxaad iminka si toos ah ula hadli kartaa qofka ku caawinaya.
4. Fadlan xusuusnow in turjumaanku uusan eexasho lahayn haba yaraatee markaa adiga kuma siin doono talobixin ama hakis waxuuna si sax ah u turjumi doonaa waxa labada qof ay is yiraahdaan.

Haddii qofka ku caawinaya aad telefoonka ku wacayso:

1. Qofka ku caawinaya u sheeg in aad turjumaan u baahan tahay oo isaga u sheeg luqadda aad ku hadasho. Ereyga “interpreter” (turjumaan) waa mid dadkoo dhan ay isticmaalaan waxaana fahmi doona qofka adiga ku caawinaya.
2. Raac nidaamka kor ku xusan.